IIB MA GALO


# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho, 26 Maajo 1979 L. 3R5

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة سهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba** — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xanska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN


QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 16 ee 20 Maajo 1979, Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed.

**QAYBTA LABAAD**

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 20 Maajo 1979, Dhismaha Xoghaynta Diyaarinta Xeerka Aftida & Faafinta Maamulidda iyo Habaynta Aftida.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24 ee 20 Maajo 1979, Magacaabid Xubno Guddi iyo Xoghayaha Hawlaha Diyaarinta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka ee J. D. S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 25 ee 20 Maajo 1979, Ku dhawaaqidda maalinta Aftida Dastuurka J. D. S.

**QAYBTA SADDEXAAD**

## QAYBTA KOOWAAD
## SHARCI

SHARCI L. 16 ee 20 Maajo '79, Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY Xaashada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaa Xukunka Dalka oo loo wareejiyey Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Qod. 7aad ee Xaanshada 1aad, iyo kan 9aad ee Xaanshada 3aad ee Kacaanak 21 Oktoobar 1969 oo ku saabsan DASTUURKA JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA Aftidiisa iyo doorashada Cadaaladeed ee Dadweynaha;

ISAGOO TIXGELIYAY Go'aankii Golaha Dhexe ee X.H.K.S. iyo guddoonkii Shirweynaha aan Caadiga ahayn ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kuna saabsanaa oggolaanshada DASTUURKA JAMHURIYADA DIMUQRADIGA SOMALIYA oo ay soo diyaariyeen Guddiga Mashruuca Dastuurka JDS oo lagu dhisay Xeer Madaxweyne lamb. 90 iyo 91 ee 20 Oktoobar 1977;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1

Waxaa la oggolaaday DASTUURKA JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOOMAALIYA.

### Qod. 2

DASTUURKA JDS wuxuu ka kooban yahay 114 qodob waxaana loo bandhigi doonaa Dadweynaha Soomaaliyeed ee Jamhuriyadda deggan si ay codkooda uga dhiibtaan si Madax Banaani ah.

### Qod. 3

DASTUURKA waxaa lagu baahin doona Faafinta Rasmiga ee J.D.S. Raadiyooga iyo wargeysyada rasmiga ah si ay dadweynaha ula socdaan:

### Qod. 4

Sharcigan wuxuu dhaqan galaayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 20 Mag.. 1979

JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA J.D.S.

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 20 Maajo 79, Dhismaha Xoghaynta Diyaarin Xeerka Aftida iyo Faafinta Maamulidda iyo Habaynta Aftida.

### MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO AARKAY Xaanshida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 kuna saabsan Xukunka iyo Maamulka Guud ee Dalka oo loo wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Qod. 9aad ee Xaanshida 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 oo farayey in la soo saaro Dastuurkii lagu maamuli lahaa Dalka;

ISAGOO ARKAY Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo go'aannadii ka soo fuleen fadhiyada Shirweynaha oo aan caadi ahayn ee X.H.K.S. kuna saabsanaa Mashruuca Dastuurka Dalka oo lagu guddoonsaday shirkaas.

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha I, 90 ee 20 Oktoobar 1977 oo lagu dhisay Xoghaynta Hawlaha Diyaarinta Dastuurka iyo xeerka lagu mgacaabay xubnaha Guddiga Diyaarinta Abaabulka Dastuurka Dalka.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan in la soo diyaariyo lana qaban-qaabiyo Xeerka Afitda Dastuurka Dalka oo la hordhigi doono Dadweynaha lana dejiyo nidaamka howl galka la xiriira aftida Abaabulka Dastuurka oo gundhig u ah qod. 9aad ee Xaanshada 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELIYAY Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed fadhigiisuna ahaa 30 Abriile 1979 oo uu ku oggolaaday Abaabulka Dastuurka Dalka lagu maamuli doono.

### WUXUU XEERAYAA

#### Qod. 1

Waxaa xeerkan lagu dhisay Xoghayn oo lagu magacaabo Xoghaynta Dhexe ee Hawlaha Diyaarinta Xeerka Aftida, Faafinta iyo Maamulidda Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka.

#### Qod. 2

Xarunta Xoghaynta Dhexe waxay noqonaysaa magaalada Madaxda J.D.S. waxayna yeelanaysaa Laamo Gobollada iyo Degmooyinka oo dhan.

Qod. 3.

Xoghaynta Dhexe waxaa madax u noqon doona Xoghaaye lagu magacaabi doono Xeer u gaar ah.

Qod. 4.

1. Xoghaynta Dhexe waxay hoos-imaanaysaa laba Guddi oo heer Qaran oo kala ah:

i — Guddiga Diyaarinta Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka;

ii — Guddiga Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida Dastuurka;

2. Xubnaha Guddiga Diyaarinta Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka wuxuu ka koobnaan doono lix xubnood oo lagu magacaabi doono Xeer u gaar ah;

3. Xubnaha Guddiga Faafinta, Maamulidda iyo Qaybta Aftida Mashruuca Dastuurka wuxuu ka koobnaan doono 11 xubnood, waxaana lagu magacaabi doonaa Xeer u gaar ah;

4. Go'aanka Guddiyada haday bar-baro noqdaan xubnaha oo uu Guddoomiyaha la jiro ayaa codka yeelanaaya.

Qod. 5

Xilka Guddiga Diyaarinta Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka waa sida soo socota:

b — In ay soo diyaariyaan, abaabulaan Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka iyagoo gundhig ka dhiganaaya sharciyada iyo xeerarka dalka u yaala;

t — In ay abaabulkaa Xeerkas ku muujiyaan arrimaha la xiriira: ujeeda aftida, dadka ka qayb geli kara, qalabka aftida lagu galaayo tilmaamahooda ama sumadahooda, habka aftida, xafiisyada ku hawl yeelanaaya aftida, dembiyada ka soo dhalan kara iyo wixii danta ama ujeedada aftida lagu hirgelinaayo si cadaalad ah;

j — In ay u soo gudbiyaan abaabulka Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka JDS Golaha Dhexe ee Xisbiga HKS si loo sharciyeeyo muddo ku siman 15 Junyo 1979.

Qod. 6

Xilka Guddiga Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida Mashruuca Dastuurka J.D.S.:

1. Dib u daabicidda iyo baahinta Mashruuca Dastuurka;

2. ka dhaadhicinta iyo u sharixidda Mashruuca Dastuurka Dadweynaha iyo wixii tababar iyo seminaaro ah ee shaqadaasi u baahato;

3. Diyaarinta misaaniyadda gaarka ah oo loogu talo galo fulinta Aftida;

4. Diyaarinta Qalabka, gaadiidka, warqadaha iyo wixii ka-le oo fulinta Aftida loogu baahido;

5. Habsami u socodsiinta qaadida aftida.

Qod. 7

Guddiga ku xusan qod. 6aad ee Xeerkan, wuxuu yeelanayaa saddex guddiyo hoosaad ee maamuleed iyo kuwo heer Gobol iyo Degmo oo midkoodba yeelan doono Xoghayn.

Guddi hoosadyadaas waxay kala yihiin:

i — Guddi Hoosaadka Baahinta, Dastuurka iyo kicinta Dadweynaha;

ii — Guddi Hoosaadka Maamulidda Aftida;

iii — Guddi Hoosaadka Kormeerka Aftida;

Guddiyo hoosaadka Maamulidda Aftida iyo Kormeerka Aftida waxay maamul ahaan hoos imaan doonaan Guddiga Faafinta, Maamulidda Aftida, hase yeeshee xilkooda, awoodooda iyo habka loo magacaabaayo waxaa lagu sheegi doonaa Xeerka Aftida Mashruuca JDS.

Guddiyo Hoosaadka kor ku xusan waxaa ka mid noqon kara xubno dibadda ka ah Guddiga heerka Qaranka ee Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida.

Qod. 8

1. Xoghaynta Dhexe ee yeelanaysa cudud ay ku shaqeyso xilkeedu waa sida soo socota:

i — Qabanqaabinta hawlaha la xiriira Guddiyada Sare ee heer Qaran, kan Gobol iyo akn Degmo;

ii — Iskuduwidda hawlaha iyo xilka Guddiyada;

iii — Diyaarinta ajendada fadhiyada Guddiyada;

iv — Qoridda go'aannada, baahintooda, fulintooda, keydintooda iyo fulinta wixii amar ah oo ka soo baxa labada Guddi ee heer Qaran.

2. Xubnaha la shaqeynaaya Xoghaynta Dhexe waxaa magacaabaya ama xulaya Guddiga Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida;

## Qod. 9

Xoghaayaha Xoghaynta Dhexe wuxuu mas'uul ka yahay:

i — Maamulka guud ee shaqada Xoghaynta Dhexe iyo Laamaha hoos yimaada;

ii — Habsami u socodsiinta hawlaha Hoghaynta Dhexe.

Xoghaayaha Xoghaynta Dhexe waxaa xilkiisa iyo awooddiisa dhanka maamulka lacagta iyo wixii kale u dhigmaan heer ka sareeya Agaasime guud (Capo Gabinetto).

## Qod. 10

Qorshaha loogu talo galay hawlaha Guddiga Faafinta Maamulidda iyo Habaynta Aftida iyo kan Xoghaynta Dhexe waa sida soo socota:

1 — Diyaarinta DASTUURKA JDS laga bilaabo 31 Maajo 1979;

2 — Bilaabidda brobogaandada Baahinta DASTUURKA laga bilaabo 5 Juunyo 1979;

3 — Wadidda seminaarka Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka laga bilaabo 15 Juunyo 1979 1979;

4 — Soo gudbinta tirada iyo magacyada qoobaha aftida ee Degmo kasta maalinta 25 Juunyo 1979;

5 — Dhamaystirka Qalabka Aftida 20 Luulyo 1979;

6 — Gaarsiinta Qalabka Aftida Gobollada iyo Degmooyinka 10 Agosto 1979;

7 — Gaarsiinta Qalabka Aftida qoobaha lagu gaadaayo Atida ugu yaraan lix saac ka hor saacadda ay bilaabanayso aftida

## Qod. 11

Hayadaha Dawladda oo dhan waxay u joogsanaayaan taabogelinta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka iyagoo gacan ku siinaaya wixii ay Guddiga Heer Qaran ee Faafinta? Maamulidda iyo Habaynta Aftida ay ugu baahdaan iyo in ay ku dadaalaan si ay Aftida Mashruuca Dastuurka ugu dhacdo hab wacyi iyo garasho leh xasiloonidda iyo nabadgelyada Dalkana wax ugu dhimin.

## Qod 12

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla marka u saxiixo Madxweynaha J. D. S.

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 20 Maajo 1979

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J. D. S.

XEER Madaxweynaha J.D.S. L. 24 ee 20 Maajo 7979, magacaabid Xubno Guddi iyo Xoghayaha Hawlaha Diyaarinta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka ee J.D.S.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha J.D.S. oo ku saabsan DhismahaXoghaynta Hawlaha Diyaarinta Xeerka Aftida, Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka;

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama maarmaan xubnaha Guddiga kala ah: Guddiga Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida iyo Guddiga Diyaarinta Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka; iyo Xoghayaha Xoghaynta hawlaha la xiriira Aftida Mashruuca Dastuurka;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS ay yeesheen 30 Abriile 1979 kuna saabsanaa Aftida Dadweynaha looga qaadi doono Mashruuca Dastuurka Dalka.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay Xubno GUDDIGA FAAFINTA, MAAMULIDDA IYO HABAYNTA AFTIDA:

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1 — | Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax | Guddomiye | |
| 2 — | Jaalle S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla | Guddoomiye Ku-Xigeen | |
| 3 — | Jaalle G/Sare Cabdulqaadir Xaji Moxamed | Xubin | |
| 4 — | Jaalle S/Guuto Jaamac Maxamed Qalib | » | |
| 5 — | Jaalle Dr. Axmed Ashkir Botaan | Xubin | |
| 6 — | Jaalle Adan Moxamed Cali | » | |
| 7 — | Jaalle Dr. Cabdisalaam Shekh | » | |
| 8 — | Jaalle Dr. Kenadiid Axmed Yusuf | » | |
| 9 — | Jaalle S/Guuto Aden Cabdi Ducaale | » | |
| 10 — | Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle | » | (Xoghaye) |
| 11 — | Jaalle S/Guuto Yusuf Axmed Salxaan | » | |

## Qod. 2

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay Xubno GUDDIGA DIYAARINTA XEERKA AFTIDA MASHRUUCA DASTUURKA:

1 — Jaalle Dr. Axmed Ashkir Botaan — Guddoomiye

2 — Jaalle S/Guuto Jaamac Moxamed Qaalib — Xubin

3 — Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle — Xubin (Xoghaye)

4 — Jaalle G/Sare Maxamuud Maxamed Casayr — Xubin

5 — Jaalle Dr. Maxamuud Shire — Xubin

6 — Jaalle Dr. Axmed Cali Salax — Xubin (Kaaliye Xoghaaye)

7 — Jaalle Prof. Maxamed Xasan Mudey — Xubin

8 — Jaalle Dr. Xasan Maxamed Cusmaan — Xubin

## Qod. 3

Xoghayaha Xoghaynta dhexe ee Diyaarinta Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida iyo kan Diyaarinta Xeerka Aftida waxaa loo magacaabay Jaalle Axmed Jaamac Cabdulle.

## Qod. 4

Xilka iyo awooda Xubnaha Guddiyada ku tilmaaman qod. 1aad iyo kan 2aad ee Xeerkan iyo kan Xoghayaha Xoghaynta Dhexe waxay ku sheegan yihiin Xeerka Madaxweynaha J.D.S. oo lagu dhisay Xoghaynta Diyaarinta Xeerka Aftida iyo Maamulidda iyo Habaynta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka.

## Qod. 5

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta la saxiiso.

## Qod. 6

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 20 Maj. 1979

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 25 ee 20 Maajo 79
Ku dhawaaqidda maalinta Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka ee J.S.S.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY Qod. 7aad Xaanshada 1aad iyo qod. 9aad ee Xaanshada 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Xeerarka ku saabsan; Dhismaha Guddiga Diyaarinta Mashruuca Dastuurka Dalka, kan Guddiyada Diyaarinta Xeerka Aftida Mashruuca Dastuurka iyo kan Faafinta, Maamulidda iyo Habaynta Aftida Mashruuca Dastuurka;

ISAGOO ARKAY Sharciga oggolaanshada Mashruuca Dastuurka Dalka ee J.D.S.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lgama maarmaan in lagu dhawaaqo maalinta Mashruuca Dastuurka Dalka ee JDS Afti ahaan loo hordhigaayo Dadweynaha;

ISAGOO TIXGELIYAY Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS fadhigoodii ahaa 30 Abriile 1979

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Waxaa la guddoomiyay in Mashruuca Dastuurka Dalka ee J.D.S. oo lagu dhaqi doono Dalka oo go'aankiisu yeeshay XisbigaHantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Shirweynahiisa aan caadiga ahayn iyo kan Golaha Dhexe ee XHKS la hordhigaa Dadweynaha in ay codkooda ka dhiibtaan Gobol ama Degmo kasta ee Jamhuuriyadda ah ha joogeene.

Qod. 2

Aftida Mashruuca Dastuurka Dalka ee J.D.S. oo lagu soo tilmaamay qod. 1aad ee Xeerkan wuxuu socon doonaa Maalinta 16 Agosto 1979 saacadda markay tahay 6.00 subaxnimo ilaa 18.00 maqribnimo. Haddii loo baahdo codbixinta waxaa la gaarsiin kara ilaa 22,00 fidnimo.

Qod. 3

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 20 Maj 1979

Jaalle MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA J.D.S.